# Keydinta Diiwaanka Waxay Taageertaa Ka Qaybgalka Waalidka ee Qorshaynta Waxbarashada Gaarka ah

(Record Keeping Supports Parent Participation in Special Education Planning - Somali translation)

Diiwaangelintu waxay kaa caawineysaa inaad la socoto horumarka waxbarasho ee ilmahaaga iyo beddelidda baahida waxbarasho, xiriirka degmada dugsiga, iyo dukumiintiyo badan oo kala duwan oo la xiriira koritaanka ilmahaaga iyo horumarka dugsiga sanadeedka.

Abaabuliodda nidaam diiwaanada ilmahaaga waa hab wax ku ool ah, oo loogu diyaar garoobo Shirarka kooxda ee Qorsheynta Barnaamijka Waxbarashada Gaar-ahaneed (IEP). Tixgeli qodobada soo socda marka aad abaabuleyso nidaamka habeysan, ee adiga kuu shaqeeya:

## Barnaamijka waxbarashada gaarka ah ee hadda jira

- Barnaamijka Waxbarashada Shaqsiga ee Hadda (IEP*)
- Qorshaha Taakulaynta Habdhaqanka Wanaagsan (PBSP), haddii lagu dabaqi karo
- Warbixintii Qiimaynta ee ugu dambaysay oo ay dhammaystirtay degmada dugsigu
- Ogeysiisyada Kulanka, Ogeysiinta Hore ee Qoraalka (PWN), iyo nuqulada foomamka oggolaanshaha/ Diidmada waalidka ee saxiixan, ee la xiriira sanadka IEP ee hadda jira
- Nuqulada Ogolaanshaha Waalidka ee Saxiixan ee fasaxaya siideynta Foomamka Macluumaadka ee hadda hirgalaya
- Ogeysiinta Ilaalinta Hab-Raaca Sharciyeed

## Diiwaanadi hore ee waxbarashada gaarka ah

- Qorshahi hore ee waxbarashada gaar-ahaneed IEP iyo Qorshihi hore ee Taakulaynta Habdhaqanka Wanaagsan PBSP
- Warbixinnadii Qiimaynta Hore oo ay dhammaystirtay degmada dugsigu
- Ogeysiisyada Kulanka, Ogeysiinadi hore ee qoraalka (PWNs), iyo nuqulada foomamka oggolaanshaha/ Diidmada waalidka ee saxiixan ee la xiriira Qorshahi hore ee waxbarashada gaarka ah IEP

## Xiriirka isgaarsiinta guriga iyo dugsiga

- Qorraalada shirarka koxda Waxbarashada gaarka ah IEP, Shirka macalimiinta iyo waalidka, iyo kulanada kale ee dugsiga
- Buugga xiriirka telefoonnada iyo xiriirka shaqsiyeed ee macallimiinta, bixiyeyaasha adeegga IEP, iyo maamulayaasha
- Xiriirka imaylka ah ee shaqaalaha dugsiga
- Nidaamka isgaarsiinta guriga-dugsiga sida (dugsiga oo dhan, fasalka ku salaysan, ama lala sameeyay kooxda IEP gaar ahaan ilmahaaga)

**Dhammaan tixraacyada Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEP) ayaa sidoo kale khuseeya ardayda helaya adeegyada waxbarashada gaarka ah Qorshaha Adeegga Qoyska shaqsiyeed (IFSP).*

**©2021, PACER Center, Inc. | Handout code: PHP-c155so**
8161 Normandale Blvd., Minneapolis, MN 55437 | (952) 838-9000 | (800) 537-2237
PACER@PACER.org | PACER.org

## Kaararka warbixinta iyo natiijooyinka imtixaanka

- Kaararka warbixinta waxbarashada guud
- Warbixinta horumarka Waxbarashada Gaarka ah IEP
- Natiijooyinka qiimaynta degmada iyo gobolka oo dhan (tusaalo: MAP; MCA)
- Darajada imtixaanka caadiga ah ee la xiriira qorshaynta dugsiga sare kadib (tusaalo: ACT; SAT; Accuplacer)

## Abaalmarinta iyo tusaalooyinka koritaanka

- Abaalmarinta dugsiga
- Tusaalooyinka shaqada dugsiga, oo ay ku jiraan meelaynta, mashaariicda, iyo imtixaanaadka muujinaya halganka iyo awoodaha
- Abaalmarinnada iyo guulo laga kasbaday ururada jaaliyadda
- Dukumentiyada la xiriira ka -qaybgalka ilmahaaga iyo ka -qaybqaadashada hawlaha jaaliyadda dhexdeeda, gaar ahaan kuwa ku xiran danahooda iyo waxa dhiirrigeliya

## Diiwaannada kale oo muhiimka ah

- Diiwaanka xaadirka dugsiga
- Warbixinnada akhlaaqda iyo diiwaanada adaabta
- Ardayga sanad dugsiyeedka degmada iyo buugga nidaam raaca waalidka
- Diiwaanka caafimaadka
- Qiimaynta shaqsiyeedka ah
- Qorshaha shaqsi ahaaneed ee ilmahaaga oo ay soo diyaariyeen hay'ado madax-banaan (Tusaalooyin: Qorshaha Adeegga Shakhsiyeed oo lala abaabulay shaqsi, sida bixiyaha adeegyada guriga iyo bulshada oo uu waiver-ku bixiyo; ama Qorshaha Shaqsiyeed ee Shaqaalaynta oo lala abaabulay dadka shaqaaleynta ka caawiya ee loo yaqaan Vocational Rehabilitation Counselor)

## Khayraadka

☐ ***Diiwaanka Kaydinta amuuraha Waxbarashada Gaarka ah***

Faylkan wuxuu abaabulayaa waraaqaha dugsiga lix qaybood, oo saacidaya si loo taageero ka qaybgalka waalidka xagga qorsheynta waxbarashada gaarka ah. Waxaa lagu heli karaa Ingiriis, Hmong, Isbaanish, iyo Soomaali. $10 set kasta – iyo mid bilaash ah waalidka markay codsadaan. $10 (PHP-a5)

☐ ***Faylka Waalidka ee Caafimaadka Maskaxda ee Carruurta***

Fayl leh macluumaad loogu talagalay waalidiinta ee wixii diiwaanada, warbixinnada, iyo isgaarsiinta iimaylka ee taqasuska. Buug xiriirka lagu xiriirka lagu qoro. $ 2 midkiiba - mid bilaash ah ee waalidka markay cosadaan.

☐ ***Keydsiga iyo isu-duwidda Diiwaanka Caafimaadka***

Haysashada nuqulada diiwaanka caafimaadka ilmahaaga waa qayb muhiim ah, ee ah doorka aad ku leedahay u-doodista ilmahaaga.Talooyin ka socda PACER ee ah sida loo helo nuqulada diiwaanada caafimaadka, waxyaabaha la keydsado, iyo sida la isugu duwo. Bilaash kombiyutarka ugala soo bax.

☐ ***Diiwaanka Dugsiga iyo Xuquuqda Waalidiinta***

Dulmarka guud ee xuquuqda waalidka ee ku saabsan diiwaanada dugsiga ee hoos imaanaya Sharciga Waxbarashada Shakhsiyeed ee dadka Naafada ah (IDEA), Xuquuqda Waxbarshada Qoyska iyo Xeerka amuuraha shaqsiyeed ee Qarsoonida (FERPA), iyo Xeerka Dhaqanka Xogta Dowladda Minnesota. Bilaash ugala soo bax kombiyutarka.

❒ ***Diiwaanka Caafimaadka Dugsiga: Amuuraha shqsiyeed ee asturan iyo helistooda***

Sida uu qabo sharciga Minnesota iyo kan federaalka, diiwaanada caafimaadka dugsiga waxaa loo tixgeliyaa diiwaanada waxbarashada. Macluumaad ku saabsan xuquuqdaada iyo xuquuqaha ilmahaaga ee asturan iyo helistooda. Bilaash ugala soo bax kombiyutarka.

❒ ***Kulanka Waxbarashada gaar-ahaneed, liiska Hubinta ee Waalidku Adeegsado***

Liiska hubinta xeeladaha la adeegsado, kahor kulanka, inta lagu jiro kulanka, iyo kadib kulanka ee kooxda Waxbarashada Gaar-ahaneed (IEP) si loo taageero ka -qaybgalkaaga iyo ku lug-lahaantaada. Bilaash ugala soo bax kombiyutarka.

❒ ***Qorsheynta Kulanka Kooxda Waxbarashada Gaar-ahaneed***

Qalab qorshayn oo kaa caawinaya inaad qeexdo waxyaabaha aad welwelka ka qabto, su'aalaha, iyo yoolalkaaga kooxda Waxbarashada Gaar-ahaneed IEP ee kulanka soo socda, oo la soco natiijooyinka ka so baxa. Bilaash ugala soo bax kombiyutarka.